

FARIIN MUHIIM AH OO KATIMID GUDIGAAGA WAXBARASHADA COLUMBUS IYO EE LAGU QAADO  
QIIMEYNTAADA WAXBARASHO  
IYO MADAXA FULINTA/AGAASIMAHA SARE DAN GOOD

16ka November, 2017

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiyada Magaalada Columbus,

**Badbaadadu waa mudnaanta koobaad ee aan ka sameyno Dugsiyada Magaalada Columbus.** Inkastoo aan sameynay guulo lataabankaro oo lagu abuurayo deegaan nabad-gelyo ee iskuulka sanadihii lasoodhaafay -waxaa ka mid ah kororka weyn ee shaqaalaha, qalabka, tababarka, iyo ilaha aan maalin walba u qoondeeyno nabad-gelyada iyo ammaanka dhismayaasha - waxaan ognahay in khatarta ka imaan karta xaafadaha ka baxsan dugsiyadeenna ay saameyn dhab ah oo toos ah ku yeelanayaan deegaanka iyo dareenka bulshadeed ee fasaladdeena iyo qolalka dhexdooda.

Warqaddan, waxaan rabnaa gacan-siintiinna si aan u-yareyno khatarta ka imaan karta ee halista ku ah nabad-gelyada deegaanka iyo taageeradiina ee aan ka hirgalinayno iskuuladeena. Qof nagamid ahna kaligiis masamaynkaro.

**Ugu horreyntii, waxaan ku weydiineynaa inaad waqti u hurto si aad ilmahaaga ugala hadasho si toos ah oo cad oo ku saabsan waxyaabaha aan habooneyn in la keeno dugsiiga.**Sida adiga oo kale, waxaan dhib ku badnaa warbixinnadii ugu dambeeyay ee ardayda hubka keena dhismayaasha. Degmadeena waxay leedahay siyaasada dulqaadkeedu yahay Eber ee lahaanshaha hubka, iyadoon loo eegin xajmiga ama nooca, iyo dambiyada u-horseedi kara si loo joojiyo ama meesh ka saara. In kastoo maamulayaasha iyo kooxaha nabadgelyadu badanaaba ay lawareegaan hubkan ka hor inta ayna cidna wax yeelin, ardayda doonaysa in ay iska indha-tiraan tilmaamahan nabad-gelyada ee muhiimka ah ayaa si buuxda loola xisaabtami doonaa. Adoo-mahadsan xusuusi ardaygaaga inuusan keenin iskuulka wax kasta oo u-eg hub ama loo arki karo hub.

**Marka labaad, adoo mahad-san ku dhiirigeli ilmahaaga inuu had iyo jeer la wadaago macallin, xubin shaqaale, ama maamulaha markay arkaan wax halis gelin kara ammaanka ardayda kale ama iskuulkeenna.** Mid ka mid ah ilaha nabad-gelyada ee ugu weyn Degmada waa xiriirka kalsoonida hana-qaaday ee kadhaxeeya ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo kooxaha nabad-gelyada. Gacansiintaata, waxaan xoojin karnaa ballanqaadkan "Wax arag. Wax sheeg."

**Marka seddexaad, naga caawi in aan aqoonsanno qaar badan oo bulshada shaqada ka wada-dhaxayso ka mid ah oo gacan ka geysan kara in la kordhiyo aagageenna nabdoon iyo in la yareeyo fal-dambiyeedyada deriska nagu xeeran.** Waxaan ilaalinaa intabadan naba-gelyada ardayda markaan ku hayno meelo nabdoon, inta lagu jiro waqtiyada nabdoon ee maalinta, iyo jidka aan dhamaatka laheyn ee waxbarashada iyo koritaanka qofeed. Nala qaybso fikradahaaga ku saabsan sida aan u sii xoojin karno dadka kale ee bulshadeenna si aan ugu biirino dadaalkeena oo aan taageerno istaraatiijiyad iskaashi si loo yareeyo fal-dambiyeedyada oo dhan isla markaana loo sii kordhiyo fursadaha kahortaga ee qoysaska badan.

Haddii aad su'aalo qabtid, adoo mahadsan la hadal maamulaha ilmahaaga ama wac Xafiikaayaga Xiriirka Macaamiisha ee 614.365.8888.

Toddobaadyada soo socda, waxaanu bilaabi doonaa dadaal dheeraad ah si loo sii hagaajiyo loona ilaaliyo nabad-gelyada iyo wanaaga ardaydeenna, shaqaalaha, iyo dhammaan kuwa soo booqda dhismahayaga. Waxaan ballanqaadaynaa inaan idin wargalino. Soo noqodkiinna, waxaan idin weydiineynaa inaad nagu soo biirtid si aan u-adkeynno nabad-gelyada oo ah mudnaanta koowaad iyo taageerida dhammaan da'yarta Iskuuladeenna Magaalada weyn ee Columbus.

Mahad-sanid.



Gary L. Baker, II  
Board President




Michael Cole  
Vice President



Eric Brown  
Board Member



W. Shawna Gibbs  
Board Member



Mary Jo Hudson  
Board Member



Dominic Paretto  
Board Member



Ramona R. Reyes  
Board Member



Dr. Dan Good  
Superintendent/CEO